



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Juun 27, 2022

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Maalgelinta waqtiga kala guurka ee loogu talagalay isbeddelada noocyada heerka lacageed ee Luulyo 1

ODDS ayaa ka shaqeynaysa in ay bixiso maalgelinta waqtiga kala guurka oo la siiyo hay'adaha daryeelka bixiya ee ay saameynta ugu badan ku yeesheen [hirgelinta kooxaha adeega iyo heerarka lacageed ee cusub](#).

Kooxaha adeega iyo heerarka lacageed ee cusub ayaa kordhi doona, ama sii ahaan doona sidoodii hore, ee loogu talagalay inta badan dadka loo adeego. Qiyaas yar oo dadka ah ayaa gali doona kooxaha adeega oo baahida heerka hoose ah iyada oo ku saleysan Qiimeynta Baahiyahooda ee Oregon (ONA), taasi oo keentay qayb lacag bixineed oo hoose.

Maalgelintani halka mar ah ma noqon doonto mid loogu talagalay daryeel bixiyayaasha oo dhan. Maalgelintani waxay daryeel bixiyayaasha saameynta ugu badan soo gaartay u saamixi doontaa in ay la qabsadaan nooca ganacsi ee cusub iyada oo la xaqiijinayo in ONA ay si sax uga turjumayso baahiyaha kuwa la taageero oo la shaqeynayso hay'ada maamulka kiiska si loo codsado waxyaabaha la iska reebay, sida ugu habboon.

**Maalgelintani halka mar ah** waxay ku saleysan tahay tirada dadka ay u adeegyo hay'ad kastaa—ma aha isbeddelada heerka lacageed ee gaarka ah. Liiska daryeel bixiyayaasha heli doona maalgelintani waxaa laga helayaa [halkani](#). ODDS waxay si toos ah email ugu diri doontaa daryeel bixiyayaasha oo uu la socdo heshiisku si dib loogu eego, saxiixo oo loo dib loogu soo celiyo si loo helo maalgelintani waqtiga kala guurka.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan waxyaabaha la iska reebay, waxaan si adag u dhiirigelinayaa ka qayb qaadashada wicitaanada taageerada farsamo ee Compass ee ku saabsan waxyaabaha la iska reebay. Faahfaahin ayaa la helayaa oo ku jirta [fariintan wax gudbinaysa](#).

Intaasi waxaa dheer, in ODDS ay si joogto ah u cusbooneysiinayso Tababarada Compass Project, iyada oo liis diiwaan gashan iyo tababarada soo socda ay ku qoran yihiin [fariintan wax gudbinaysa](#).

Waxaan kaaga mahadcelinaynaa dulqaadkaaga inaga oo sii wadna ka wada shaqeynta nidaamkani muhiimka ah.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).